




Jawaabaha su'aalaha ku saabsan:

- ✓ Barnaamijyada Gargaarka Dawada ee Qiimaha Jaban
- ✓ Barnaamijka Gargaarka Caymiska Caafimaadka ee Dawladda Georgia (State Health Insurance Assistance Program, SHIP)
- ✓ Ilaalada Caafimaadka Waayeelka (Senior Medicare Patrol)




GeorgiaCares waxay jeceshahay inay hesho tabarucayaal dheeraad ah. Si ad wax uga sii ogaatid fursadaha tubaruca ee ka jira aagaaga fadlan wac Hay'adda Aagaaga ee Gabowga.

**Wasaaradda Adeegyada
Bini'aadanka ee Georgia
Waaxda Adeegyada Gabowga**
2 Peachtree St. NW, 9th Floor
Atlanta, GA 30303-3142

Tilifoon: 1-800-669-8387
FAAKIS: 404-657-5285
www.dhr.state.ga.us

Somali




1-800-669-8387
Iskaashi Shicib iyo Dawlad



La-talinta Caymiska Caafimaadka, Gargaar iyo U-gudbin Loogu Talogalay Waayeelka

GeorgiaCares waxa loogu talogalay in wax lagu baro waayeelka lagana gargaaro inay codsadaan dhamaan barnaamijyada gargaarka dawada dhakhtar qoray ee la heli karo ee qiimaha jaban. Waxa *GeorgiaCares* ku jira Barnaamijka Gargaarka Caymiska Caafimaadka ee Dawladda Georgia (State Health Insurance Assistance Program, SHIP) iyo barnaamijka Ilaalada Caafimaadka Waayeelka (Senior Medicare Patrol). La-taliyayaal tabarucayaal ah oo la tababaray ayaa dadka qaata gargaarka caafimaadka (Medicare) ka caawiya sidii ay u fahmi lahaayeen xulashada barnaamijka gargaarka caafimaadka (Medicare) iyo caymiska caafimaadka ee la xidhiidha.

GeorgiaCares waa barnaamij ay ku shuraakoobeen Shicib iyo Dawlad oo ay soo qabanqaabisay Wasaaradda Adeegyada Bini'aadanka, Waaxda Adeegyada Gabowga iyo Hay'adaha Aagga ee Gabowga. Shuraakada waxa ku jira: shirkado dawo, farmashiiyo, dhakhaatiir, cisbitaalo, Jaamacadaha Dawladda iyo hay'ado kale.



GeorgiaCares waxay bixisaa:

- ✓ **War ku saabsan:**
Barnaamijyada gargaarka dawada dhakhtar qoray ee qiimaha jaban
Caymiska caafimaadka
Daryeelka la maamulo
Caymiska daryeelka mudada dheer
Caymiska Caafimaadka ee Kabista ah
Medigap (Medical Supplemental Insurance)
Barnaamijyada dhigashada Medicare
- ✓ **Waxa lagaa gargaari:**
Codsiga dhamaan barnaamijyada gargaarka dawada dhakhtar qoray ee qiimaha jaban
Fahmida xuquuqdaada marka ad tahay Qof Qaata Medicare
Fahmida Ogeysiiska Koobista ah ee Medicare (Medicare Summary Notice, MSN)
Isbarbardhigida iyo qiimaynta qorsheyaasha caymiska caafimaadka iyo daryeelka la maamulo
Fahmida biilasha caafimaadka iyo gargaar lagaa siiyo samaysashada codsi ah bixin kharash caafimaad.
- ✓ **Gargaar lagaa siiyo arrimaha Medicare ee adag**
- ✓ **U-gudbinta hay'adaha kale ee haboon**
- ✓ **Waxbaridda beesha**
- ✓ **La-talin is-arag ah ama tilifoonka la isticmaalayo**

Wac 1-800-669-8387